



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 15, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ilaha COVID-19

Sida aad ogtahay xaalada ku saabsan tallaalada COVID-19 waa mid si degdeg ah isku beddelaysa iyada oo Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka uu ka shaqeynayo in uu qof kasta la socodsiiyo macluumaadka cusub hadba sida aanu u helno.

Waxaanu toddobaadkan dejinay ilo dhowr ah oo aan rabay in qof kastaa uu ka warqabo. Halkan waxaa ku qoran liiska qaar ka mid ah ilaha cusub:

- [Xaashida Xaqiiqda ee Wajiga 1](#) oo gacan ka geysata sharraxaada adeegyada I/DD ee ka tirsan kooxda tallaalka ee Wajiga 1a. Xaashida xaqiiqda waxaa lagu turjumay luqaddo badan [website-ka COVID-19](#) meesha hoos timaada Ilaha Dadka/Qoyska.
- Dokumentiga Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo oo cusub oo wata su'aalo la xiriira nidaamka I/DD oo laga soo qaatay kulankii dhageysiga ee la qabtay Diisambar. Qaybo la turjumay ayaa la soo galin doonaa [website-ka COVID-19](#).
- [Fiidiyowga Powtoon oo dhaqdhaqaaqaya](#) oo sharraxaya sida heerarka halista ah ee COVID-19 ka jira degaannada Oregon ay u shaqeeyaan. Fiidiyowgani wuxuu gacan ka geystaa in uu u sharraxo dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo daryeel bixiyayaashooda sababta adeegyada taageero ee hada la heli karo ay u kala duwanaa karaan iyada oo ku xiran nolosha qofka. Fiidiyowgani waxaa la helayaa isaga oo ku qoran [Ingiriisi](#) iyo [Isbaanish](#).

- [Xaashida xaqiiqada](#) waxaa loogu talagalay hay'adaha maamulka kiiska, daryeel bixiyayaasha ama shaqaalaha kale ee taageerada si ay uga caawiso qofka qaba I/DD in uu sameeyo kala doorasho ku saabsan tallaalka COVID-19. Tani waxaa la helayaa iyada oo ku qoran luqaddo badan [website-ka ODDS COVID-19](#) meesha hoos timaada Ilaha Dadka/Qoyska.

Halkan waxaa ku qoran ilaha dheeraadka ah qaarkood oo ka socda hawl-wadaagayaasha ay dhici karto in ay wax daneynayaan:

- Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ayaa leh [bogga internet-ka oo cusub](#) oo wata macluumaadka xarunta tallaalka iyo ilaha.
- Maamulka Caafimaadka Oregon [boggiisa internet-ka ee tallaalka](#) ayaa leh ilo, macluumaad iyo Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo.

Waad mahadsan tihiin dhammaantiin sii wadista taageerada caafimaadka iyo ammaanka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.